



# FAAFINTA XASILOONIDA dugsiga 2018

Sidee ayaad saameyn u sameynt kartaa? Ma ogtahay in wax yar oo aad qabato ay leedahay saameyn weyn? Marna ma ku fakartay sidaan dhammaanteen u sameyn laheyn saameyn?

Maanta 22.8.2018 Vantaan Energia areena waxaa lagu baahinayaa markii 28 aad xasiloonaada dugsi. Sannadkan waxa uu mowduucu yahay saameynta wanaagsan iyo sida wax yar oo la sameeyo ay u yeelan karto saameyn weyn. Qaababka saameynta wanaagsan way badan yihiin. Habka ugu badan ee dugsi kasta uu isticmaalo waa gudiga ardayda, kaas oo ku kooban dugsi dhexdiisa.

inta badan dugsiyada hoose waxa ay leeyihiin arday arday ku mataaneysan, kaas oo ka caawiya ardayga cusub la qabsiga dugsi, sidoo kalana waxa uu u noqdaa Tusaale lagu daydo. Dugsiyada dhexe waxa ay leeyihiin arday caawiyayaal ah, kuwaas oo ay shaqadoodu ay tahay in ay hagaajiyaan la qabsiga ardayga ee dugsi cusub iyo xiiso gelintiisa.

Dhammaan ardayda ma rabaan in ay howshaas weyn sameeyaan. sidaas oo ay tahay dhammaan shaqaalaha dugsi iyo ardayda wax yar oo ay sameeyaan ayaa leh saameyn wanaagsan oo weyn. sida dhoola-cadeynta ama salaanta maalin walba ah, waa wax wanaagsan. Markaas ma jireyso arbushaad, dhammaan saaxiibo ayaa la noqonayaa, taas oo aad ugu wanaagsan xaaladda dugsi. Sidoo kale dhinaca baraha bulshada waxaa lagu faafin karaa fikrado wanaagsan oo saameyn wanaagsan leh, waxaad dhiiban kartaa aragtidaada. Dhammaan arrimahan waxay saameyn ku leeyihiin nolol maalmeedka, wax ka muhiinsanna ma jirto. Haddaba aynu bilowno saameyn wanaagsan ama aynu dhoola-cadeyno, waxqabadkaagu waa muhiim.

**”Adigu saameyn ayaad leedahay – dhoola-cadeyntu waa caawin.”**